

BARNAAMIJKA QORSHAHA WAXBARASHADA (IEP) TALO SINTA WAALIDIINTA

QIIMEYNTA

U Diridda Iyo Codsiga Qiimeynta Ugu Horeysa:

- ✓ Ku codso si qoraal ah qiimeynta; nuqul (koobi) ka reebo codsiga.
- ✓ Faahfaahin ka bixi dhibaataada ilmahaaga heysata iyo sababta qiimeynta loogu baahan yahay.
- ✓ Ogolaashaha waaldka ayaa loo baahan yahay si loo sameeyo qiimwynta.
- ✓ Waalidiintu waxa ay xaq u leeyihiin Qiimeyn Waxbarasho oo Madax banaan ee ardayga haddii aysan ku raacsaneyn qiimeynta dugsiga.

Su'aalaha La Iska Weydiyo Qiimeynta:

- ✓ Maxaa lagu cabirayaa tijaabada?
- ✓ Waa heerka caadiga ama celcelis ahaan laga doonayo?
- ✓ Waa maxay heerkailmahayga marka loo fiiriyo heerka caadiga ah?
- ✓ Maxay taasi ka dhigan tahay marka loo eego barashada ilmahayga?

Shuruurdaha

- ✓ Iyada oo ku saleysan qiimeynta iyo ra'yiga kooxda IEP.
- ✓ Ardaygu waa inuu ka soo baxaa mid ka mid ah 13 qodob ee looga baahan yahay ardayda loo fidiyo waxbarashada gaarka ah. (Akhri buugga IEP si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.)

U DIYAARGAROOWGA KULANKA IEP

U Diyaargaroowga Kulanka IEP:

- ✓ Soo ururi macluumaadka si aad ula wadaagto: caafimaadka, cilmi nafsiga iyo qiimeynta kale.
 - Gal geli dhamaan macluumaadka muhimka ah ee la xiriira diiwaanka waxbarashada caruurtaada.
 - Dib u eeg diiwaanka dugsiga ee ardayga iyo IEP iminka lagu shaqeeyo haddii uu jiro.
- ✓ Liis ka samee waxyaabaha aad aragto in ilmahaaga ku wanaagsan yahay ama u baahan yahay.
- ✓ Qor waxyaabaha muhimadda kuu leh iyo hadafka mustaqbalka dheer ee ilmahaaga.

- ✓ Liis ka qor adeegga aad aaminsan tahay in ilmahaagu u baahan yahay si loo gaaro hadafka aad kor ku sheegtay.
- ✓ Qoro su'aalahaaga.
- ✓ La xiriir kooxda kulanka ka hore:
 - Weydiiso oo dib ugu noqo xogta qiimeynta.
 - La wadaag fikradahaaga ujeedada IEP ee kooxda sameyneysa qiimeynta.
 - Weydiiso nuqul ka mid ah ujeedooyinka horudhaca ah ee IEP ka hor kulanka kooxda.

Ku Marti gelinta dadka kale kulanka IEP.

- ✓ Waxaa laga yaabaa in waalidiintu doonayaan in ay kulanka IEP ku marti qaadaan qof laga yaabo inuu caawin karo.
- ✓ Dugsiga wargeli qofka aad ku maartiqaado kulanka IEP kulanka ka hor.
- ✓ Ardayda waxaa lagu dhiiri gelinayaa in ay ka qeyb qaataan kulanka IEP marka ay sidaas suurogal tahay.
- ✓ Xubnaha furaha u ah kooxda IEP: Waalidiinta(s), LEA (Hay'adda Degaanka ee Waxbarashada), Macalinka Waxbarashada Gaarka Ah, Macalinka Waxbarashada Guud.

KA QEYB GALKA KULANKA IEP

- ✓ Fariintaada si wanaagsan u soogudbi inta uu socdo kulanka oo dhan.
- ✓ Wakiilka LEA ayaa qabanaya kulanka.
- ✓ Xubnaha gudiga ha is sheegaan oo mid kasta haka hadlo doorkiisa.
- ✓ Waalidka waa la siiyaa ogeysiiska Ilaalinta Xuquuqda Waalidiinta ee Nidaamka Utah ee lagu faahfaahiyey xuquuqda gaarka ee waalidiinta ee sharciyada IDEA.
- ✓ Waa in aad hubisaa in dareenka aad qabto iyo meelaha ilmahaagu ku wanaagsan yahay lagu daray IEPga.
- ✓ Gaarsii in waxyaabaha muhimadda kuu leh iyo waxyaabaha aad ku talineyso lagudaro ujeedooyinka. Kala tasho kooxda sida ay ugu haboon yihiin ujeedooyinka la soo jeediyey.
- ✓ U diyaargarooow gorgortan. Ka fikir haddii ay jiraan hab lagu gaari karo ujeedooyinkaas.
- ✓ Weydiiso in lagu caddeeyo haddii aadan fahmin macluumaadka ama warbixinta.

Muxuu Ka Dhigan Yahay Saxiixaaga:

- ✓ Waa in dhamaan ka qeyb galayaashu saxiixaan IEP.
 - Dhamaan saxiixyada IEP waxa ay muujinayaan ka qeybgalka iyo joogitaanka kulanka.
 - Waalidiintu waxa ay IEP ku qori karaan "in aysan ku raacsaneyn" ama dareen ka qabaan.

DABAGALKA KULANKA IEP

- ✓ Waa in aad uga mahad celisaa shaqaalaha dugsiga dadaalka ay la yimaadeen
- ✓ La soco horumarka ilmahaagu ku talaabsnayaan.
 - La soco sida warbixinta horumarka ardayga loogu soo dirayo guriga iyo sida ugu wanaagsan ee loola xiriiro kooxda IEP.
- ✓ Isbedel ayaa lagu sameyn karaa hadba sida loogu baahdo
 - Waalidiintu waxa ay codsan karaan kulanka IEP haddii ay jiraan waxyaabo ay dareen ka qabaan ama dhibaato kala kulmaan IEP ama aanu ilamahoodu sameeneyn horumar la taaban karo.
- ✓ Waa in kooxda IEP kulmaan sanad kasta.

XALINTA DHIBAATOYINKA NIDAAMKA IEP

Si taxadarleh ugu dhaqaaq! isku day in aad xaliso khilaafaadka adiga oo hoos ka bilaabaya iyo sida ugu fudu. Haddii ay taasi shaqeyn weyso:

- ✓ La xiriir oo gaarsii kooxda dugsiga.
- ✓ Raac sida loo kala sareeyo darajooyinka sida:
 1. Macalimiinta
 2. Maamulaha
 3. Maamulaha Degmada Ee Waxbarashada Gaarka Ah/Horjoogaha
 4. Xafiiska Waxbarashada ee Gobolka Utah, Waxbarashada Gaarka Ah.

Dhamaan qodobada uu ka kooban yahay Sharciga Naafanimada ee Waxbarashada (IDEA 2004) waa mid sidoo kale khuseeya Dygsiyada Gaarka Ah.

Macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan akhri qoraalka Xarunta Waalidiinta ee Utah (Utah Parent Center) ee “Ka Qeybgalka Waalidiinta ee Nidaamka IEP (Parents as Partners in the IEP Process)” www.utahparentcenter.org/publications/handbooks



Utah Parent Center